

Qorshayaasha Ka Hortagga Xadgudubka Shakhsi ahaaneed (IAPP) ee Dadka laga Caawiyo Noloshu (AL)

[Xeerarka Minnesota, gaybaha 144G.42, xeer hoosaadka 6\(b\) iyo 626.557, iyo xeer hoosaadka 14 waxay amrayaan in IAPP la sameeyo.](#)

Qorshuhu waa inuu ka kooban yahay 1) dib u eegis gaar ah ama qiimaynta qofka u nugul in qof kale xadgudub ku sameeyo, 2) Khatarta ka dhalanaysa in qofku ku xadgudbo dadka waaweyn ee nugul, iyo bayaanada tilmaamaya tillaabooyinka gaarka ah ee la qaadayo si loo yareeyo khatarta xadgudubka, 3) oo ay ku jiraan in qofka naftiisa ku xadgudbo.

- IAPP ma ahan daryeel caafimaad ama qiimeyn kalkaalin

- Tusaalooyinka is waxyeelaynta

- Deganaha waxa uu leeyahay taariikh ah in aanu qaadan dawooyinka dhimirka ka hortagga oo waxa uu ku jiraa ballan madani ah.
- Deganaha waxa uu leeyahay taariikh is-dilid iyo isku dayo uu ku goonayo gacanta oo 3 goor ayaa isbitaal dhigay.
- Deganaha wuxuu leeyahay taariikh ah inaanay quabaysan/mayran, xaaladahan oo kale qofku wuxuu leeyahay boogo iyo nabro khatar galin kara naftiisa

Horumarinta IAPP

Yaa looga baahan yahay inuu haysto IAPP?

Dhammaan shakhsiyaadka aad u adeegayso ama aad guri dajinayso, oo ay ku jiraan daryeelka guriga.

Haa, dhammaan dadka degan guryaha daryeelka ee AL, xitaa kuwa loo arko inay guryo deegaan ah kaliya yihiin ayaa looga baahan yahay in IAPP u dhamaystiran yahay.



Goorma ayay tahay in IAPP la dhamaystiro ama dib loo eego?

- Marka la ogolaado/soo guuro
- Marka khatarta daganaha is beddesho.
 - Tusaale, Haddii degane uu ku lug leeyahay iska horimaad dhexmara dadka Meesha degan, IAPP-ga deganaha waa in dib loo eegaa si loo muujiyo nuglaanshaha (dhacdada) oo qorshe ay sameeyaan deganaha, AL iyo kooxdooda si si looga ilaaliyo xadgudubka.

Xusuusnow: IAPP ma ahan nimaad wax lagu qiimeeyo; balse, waa qorshe loo baahan yahay oo qeexaya sida adeeg bixiyaha shatiga haysta u hirgelin doono hab ilaalinaya oo caawinaya dadka deegaanka ku ah xarumaha daryeelka kana ilaalinaya xadgudubyada suurtagalka ah, kana hortagaya dadka deegaanka inay ku xadgudbaan dadka kale, oo ay yareeyaan khatarta is-waxyeelaynta, iyada oo la raacayo baaxadda adeeg bixiyaha iyo daryeelka deegaanka.

Yaa horumarin kara IAPP qof degan?

Ma jiraan wax shuruudo ah oo loogu talagalay shaqaalaha soo saara IAPP; Tani waxay noqon kartaa shaqaale kasta oo xaruntu hubiso inay aqoon u leeyahay, kartina u leh inay qiimeeyaan khatarta deganaha. Nuxurka qorshuhu waa in la sameeyo waxa muhiimka ah.

Khayraadka Horumarinta IAPP:

[Welcome to your new service \(Ku soo dhawoow adeegyadaada cusub\)](#)

[Developing the IAPP Assisted Living Horumarinta IAPP ee Adeeg Bixiyayaasha Dadka ka Caawiya Noloshu](#)

La xidhiidh

Minnesota Department of Health 651-201-4200